

Dayactirka Boosteejada Franklin Avenue

metrotransit.org/franklin

Boosteejada Franklin Avenue ee Leenka Buluuga ah ee METRO, oo la furay 2004, ayaa lagu sameynayaa dayactir weyn si wax looga qabto kaabayaasha gaboobay, cilladaha wiishashka ee soo noqnoqda, waxyaabaha duugoobay, iyo walaacyada ka dhanka ah badqabka bulshada.

Mashruuca Dayactirka Boosteejada Franklin Avenue wuxuu higsanayaa inuu dayactiro boosteejada si uu si wanaagsan ugu adeego bulshada iyadoo la hagaajinayo marin u helida, xoojinta khibradda macaamiisha, dhimida baahiyaha dayactirka, iyo kordhinta isku xirnaanta. Naqshaduhu waxay sidoo kale diiradda saari doonaan isticmaalka agab xooggan oo tamar wax ku ool ah, kuwaas oo gacan ka geysan doona kordhinta cimriga maalgashiga boosteejada iyo horumarinta waaritaanka boosteejada.

Mashruucu waa qayb ka mid ah hindisaha nidaamka Renew the Blue wuxuuna ka caawin doonaa Leenka Buluugga ah inuu ahaado mid ammaan ah, la isku halleyn karo, oo la awoodi karo sannado badan! Wax badan ka ogoow barta metrotransit.org/renew-the-blue.

Jadwalka

Naqshadeyntu waxay bilaaban doontaa Dayrta 2025. Dhismaha waxaa loo qorsheeyay inuu bilaabmo Febraayo 2027 wuxuuna socon doona ilaa iyo Diseembar 2027.

Cida Lagala Xiriirayo Mashruuca

Kevin Murray, Khabiirka Wacyigelinta
Franklin@metrotransit.org

Ahoow xog ogaal Ma danaynaysaa mashruuca? Waxaan jeclaan lahayn inaan dhagaysano fikradahaaga.

 Franklin@metrotransit.org

 metrotransit.org/franklin

 [MetroTransitMN](https://www.facebook.com/MetroTransitMN)

 612-373-3333

Call for translation

Llamar para la traducción

Gọi điện để nhận bản dịch

Wac si aad u hesho Turjimaad

Hu rau tus txhais lus